RIKU
RIKOSUHRIPÄIVYSTYS
BROTTSOFFERJOUREN

Vaireska korona saameynta uu ku yeeshay wakhtigaan hadda joogno ayaa waxa ay sababtay isbadalo badan iyo isbadalo iyo su aalooyin ku saabsan shaqooyinka. Hoosta ayaa waxaa ku qoran jawaabooyin ku saabsan su aahala ugu badan ee noo yimaado. Jawaabooyinkaan meeasha ku qoran waxaa dhici kartaa in hahdow wax isbadalo ah ku yimaadaan.

1. *Qofka shaqada dhiibay si kadis ahaan shaqaalaha wakhti go'an muu ku fasixi karaa?*

Hadey noqodo in uu shaqaalaha uu xiro ganacsigiisa mise in uu yareeyo shaqaalaha, adi wakhti go'an shaqada waa lagaa yara fadhiisini karaa, waxa ayna ka micno tahay in aad qaadatid fasax markaa lakugu siineynin musha'haar, markaasna wakhtigaas go'an waxaa tahay bilaa shaqo.
Shaqaalaha waxa ku waajib ah in uu ku siiyo **5 cisho** musha'haarkiisa laka bilaawo maalinta uu kuu sheegay in aad ka fadhiisanaysid shaqada(sida caadiga ah waxa weeyaan 14 cisho kahor in qofka laa sii ogeeysiiyo, laakin wakhtigaan vaireska korona waxaa weeyaan 5 cisho). Ugu horeentii sharkadaha ay u shaqeeyaan 20 shaqaalo waxa ay u sheegi karaan shaqaalahooda in la fasaxayo iyaadoo markaasna loo baahneen in la qabto shir laga wada hadlayo arinkaas, laakiin meesha ay ka shaqeeyaan 20 shaqaalo wax  ka badan waxa ay ku qasbanyihiin in ay qaba'qaabiyaan shir lagaga wada hadlayo shaqaalaha la fasaxayo inta ay qofna shaqada aysan ka fadhiisinin. Marka shaqaalaha shaqada laga yara fasaxayo waxa weeyaan in qofka la siiyo warqad ay ku qorantahay oona laku qiyaasayo inta ay qaadanayso wakhtiga go'an uu shaqaalaha uu ka fad-hiisanayo shaqada.

2. *Marxaladaha uu qofka shaqada dhiibay uu iku eryi karo mise tusaalo'ahaan badali karo heshiishka, meesha aan ka heli jiray musha'haar bishii uu ku badalo heshiish musha'harka la isku siinayo saaca-daha la shaqeeyay uun?*

Shaqo dhiibaha shaqaalaha waxa uu ku eryi karaa sababooyiinka sida caadiga ee shaqaalaha laku eryi karo, tani waxa ay ka micno tahay in shaqaalaha laku eryi karin iyadoo markaasi sabab fiican oo sharciyeesan aysan jirin. **Wakhtigan go'an lagama filaanka ah waxa uu sharciga ogalyahay qofka in shaqda laga yara fadhiisiyo, laakin lama eryi karo.** Wakhtiga ogeysiiska ee shaqada la iskaga eryayo (1bilood mise hadaad 5sano iyo wax ka badan heshiish ah ku jirtay waa 2bilood) waa musha'haarka caadiga in la bixiyo. Haduu shaqaalaha ku jiray wakhti tijaabo ah (waxay ay ka micno tahay in wakhtigaas tijaabada heshiishkii la sa-meeyay ay ku qorantahay), si gadis ah ayaa heshiishkaas loo burburini karaa iyadoona markaa wax sabab ah aysan jirin, sida xaaladaha marka ay caadiga yihiin oo kale. Qofka shaqada dhiibay heshiishka shaqada kuma badali karo tusaalo'ahaan hadaad eheed qof musha'haar bil ahaan loo siini jiray uma badali karo heshiishka mid ku kooban saacadha aad shaqaysid uun. Hadii ay noqoto in la yareeyo saacadaha shaqaynaysid korona vaireska dartiis, waxa la yeeli'karaa saacadihii buuxay in aad uun qeyb ka shaqaysid. Tani waxa ay soo hoos galaysaa ogeysiiskii 5 cisho kohor la is ogeysiinayay inta uu qofka shaqada uu ka wada fadhiisan markaasina uu lacakta caadi u qaadanayo, heshiishka qoran waxaa laku qorayaa in maalintii aadan si buuxo aadan u shaqaynin (tusaalo'ahaan meesha 8saacad ka shaqaynaysay in aad ka shaqaysid maalintii 4saacdood) mise maalmo waad shaqaynaysaa maalmona waad ka fadhinaysaa (tusaalo'ahaan meesha aad ka shaqaynaysay isniin – jimce waxaad ka shaqaynsaysaa isniin-arbaca). **Markaas marnaba ha sexeexin shaqada heshiish cusub.**

3. *Qofka shaqada dhiibayo muu kugu qasbi karaa in fasaxaadi sanadka kuu uruurtay   1.4.2019 – 31.3.2020, in aad qaadatid hadda?*
   **May kuguma qasbi karo.** Waxaad haq u leedahay in aad qaadatid fasaxaadi sanadka wakhtiyaasha 2.5-30.9.

4. *Maxaa sameynayaa hadii shaqada la' iga eryo mise shaqada la iga yara fadhiisiyo?*

Isla markii iska soo duuban gali Xafiiska Shaqolo la'aanta(TE-toimisto). Qofka dhalashada wadamaha Yurub ka tirsan leh, xafiiska shaqo la'aanta internetkiisa ayaad iska duubaan gelin kartaaa. Ogeysiiska marka lakaa fadhiisinayo shaqada ee 5 cisho lakugu siinayo lacakta, kabacdi waxaad si sharciyeesaan haq ugu leedahay lacakta shaqo'laanta. Waxaad ka dalban kartaa Kelada ama qasnada shaqo la'aanta hadaad eheed 14cisho shaqo la'aan mise hadaa shaqada lagaa eryay (19 cisho kabacdi markii lakuu sheegay in shaqada lakaa yara fadhiisinayo mise markii ay ka soo wareektay 1 illaa 2 bilood wakhtigii tijaabada shaqada marksaana heshiishka la burburiyay iyo markuu kuu dhamaado 5cisho oo lukugu ogeysiinayay in shaqada lakaa eryay). Tani waxa ay quseysaa oo kale qofka shaqada laka yara fasaxay. Haduu qofka shaqada dhiibay uu halmar 10 shaqaalo mise kabadan uu fasaxo, waxaa ku waajib ah in uu ogeysiiyo Xafiika Shaqo la'aanta markaana waxa loo eegayaa shaqaalahaas la fasaxay in ay yihiin kuwo isasoo duubaan galiyay.

5. *Sidee bay u saameynaysaa sharciga dalka aan ku qaatay shaqaalo ahaan mise isku keenitaanka dalbadsha reerka sharciyohooda, hadaan shaqadeydi waayay iyo dhaqaalihii isoo galayay aan ku waayay korona darteed?*

Tani qofna wali ma oga. Imigrationka ugu horeen marka reerka la isku keenayo shuruudaha dhaqaalo ee la isku xiro, waxa ay kuu xisaabinayaan macal lacakta shaqo la'aanta, hadey lacaktaasi ka timaado qasnada shaqo la'aanta (tusaalo'ahaan PAM, YTK). Imigrationka kuuma xisaabinayo lacaka shaqo la'aanta ee ka tii-maado Kelada.

6. *Maxaan samaynayaa hadaan su'aalo kale qabo mise arimahaas hadda ka hor la sheegay aysan ani ii noqon waayaan?*

Hadaad tahay qof ka tirsan jaaliyada shaqaalaha, aadna ku hadashid finish mise ingriisi, waxaa la xiriiri kar-taa jaaliyaada shaqaalaha taleefankeeda warbixinta. Waad la xiriiri kartaa macal hadaad aadan ka tirsaneyn jaaliyada shaqaalaha, waxaad u qortaa email, ama wacdaa SAK la taliyaha arimaha shaqada ee ajanabiga (Xiriirka: https://www.sak.fi/tyoelama/maahanmuuttajat ).
Hadaadan ku hadlin af finish, swedish mise ingriisi markaana aadan uga helin su'aalahaadi jawaabo halka sare, waxaad u soo diri kartaa su aalahaas help@riku.fi markaasna inaga ayaan isku dayaynaa in aan la helno wax jawaab ah taliyaha arimaha shaqada. Waxaad ogaataa in ay wakhti qaadan karto inta aad ka he-laysid jawaabta, sababtoo ah taliyaha arimaha shaqada iyo jaaliyada shaqaalaha wakhtigan laku jiro aad bay mashquul u yihiin.

Salaan,